Suaashaan Waxaa Ka Soo Jawaabay Sheekh Abu AxIlam Muuse Maxamed C/raxmaan Tarax Xafidahullaah

Suaal asalamu calaykum waraxma

waxaan ka mid nahay tageerayaasha websitken fedlen noo xeyeysii banabax blaaran an ka wedno london looga soo horjeedo gumeesiga itobiya
ale ajir waa idinka siinayaa taariqdana wa idin xusee
i soo jawaaba
waxaan idin soo diraa psterska xayaysiinya aad noo sameeneysin iyo info oo dhan   Wasalamu Calaykum

**Jawab:** السلام عليكم ورحمة الله وبركاته
walaalo marka hore waad ku mahadsantahay inaaad casharada iyo muxaadaraadka diiniga ah aad kala socoto Webkaan
walaalo wuxuu Rasuulku **صلى لله عليه وسلم** yidhi : **(الدين) النصيحة** diintu waa nasteexo iyo wax isku sheeg, markaa waxaad  codsatay in la xayay siiyo baanbax islaami ah, walaalo waxaanu kuu sheegaynaa in waxa layidhaahdo banaabaxu  in aaanu ahayn islaami , waa dhaqan gaalo , islaamkana meelna xidhiidh kalama laha , waxaa dhacay in wakhti  hore gaaladu wadamo muslimiin ah kusoo duushay oo qabsatay lamahayo cid culimada kamid ah oo tidhi mudaaharaad ama banaan bax hala qabto, waxaa lawada ogsoon yahay in banaan baxo yahay dhaqan reer galbeeed oo islaamka aan  shaqo kulahayn ,waxa kele oo ku jira mafaasid iyo dhibaatooyin  badan oo ay kamid tahay:

1. Gaalo raaacnimo iyo isku eekaysiin, (Arinkaan Maaha Mid Muslimiinta Lagu Yaqiin waa wax Gaalada Laga keenay) taas oo ah wax laynoo diiday hadaynu nahay muslumiinta, Qofka Muslimkana Waxa Waajib Ku ah in Gaalada waxkasta ku khilaafo

2. Waxa ka dhasha dhib badan, sida ikhtilaadka raga iyo dumarka, iyo isku dhac marar gaadha dil iyo dhimasho Oo Dad ay ku dhintaan Ama ku dhaawacmaan

3- Wuxuu muujinayaa Dacfi iyo Taag daro iyo inayna muslimiintu wax kele hayn. Oo Awooda Musliimntaba intaas iney ku ektahay

sidaa awgeeed waa arin xaaraan ah. culimada muslimiintuna way ka digeeen, markaas codsigaa waa mid aan sharciga waafaqsanayn,
والسلام عليكم ورحمة الله وبركاته